JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
HAY'ADDA ISTAATISTIKADA
QARANAKA SOOMAALIYEED
AGAASIMAHA GUUD

جمهورية الصومال الفيدرالية
الجهاز الوطني للإحصاء الصومالي
مكتب المدير العام

**The Federal Republic of Somalia**
**Somalia National Bureau of Statistics**
**OFFICE OF THE DIRECTOR GENERAL**

**Ref: /HIQS/ 1295 /2025** **Date: 29 / 09 /2025**

**Ku: Dhmaan Xarumaha Ganacsiyada Dalka**
**Og: Rugta Ganacsiga Soomaliya**
**Og: Xafiiska Raisuwasaaraha Soomaliya**

**Ujeeddo: Wargalin Sahanka Dhaqaalaha Ganacsiga**

Mudane/Maro,

Hay'adda Istaatistikada Qaranka (HIQS) waxay si rasmi ah u bilaawday Sahanka Dhaqaalaha ee Sannadlaha ah, kaas oo hadda ka socda dalka oo dhan. Sahankan waxa uu qayb muhiim ah ka yahay ururinta iyo diyaarinta tirakoobyada dhaqaalaha ee dalka, kuwaas oo lagama maarmaan u ah:

- Qorshaynta horumarinta qaranka
- Xisaabinta Wax soo saarka Guud ee Dhaqaalaha
- Dejinta iyo qiimeynta siyaasadaha dhaqaalaha,
- Dhiirrigelinta maalgashiga gudaha iyo dibadda.

Sida ku cad Sharciga Istaatistikada **2020 (Qodobka 27 iyo qodobbo kale oo khuseeya),** dhammaan ganacsiyada, hay'adaha gaarka loo leeyahay iyo kuwa dowladeedba waxaa waajib ku ah inay si buuxda oo sax ah u bixiyaan xogta iyo macluumaadka looga baahan yahay. Sharcigu waxa uu si cad u dammaanad qaadayaa in dhammaan xogta aad bixisaan loo adeegsan doono ujeeddooyin tirakoob oo keliya, isla markaana si adag loo ilaalin doono qarsoodiga iyo sirta ganacsiga.

Sidaas darteed, waxaan halkan idinku ogeysiinaynaa kuna adkeyneynaa dhammaan ganacsiyada in ay si hufan ula shaqeeyaan xog-uruuriyaasha ka socda Hay'adda Istaatistikada Qaranka. Wada shaqayntiinna ayaa ah furaha in la helo xog dhab ah oo ka tarjumaysa xaaladda dhabta ah ee dhaqaalaha dalka, taas oo ugu dambeyn faa'iido u leh bulshada guud ahaan iyo ganacsatada gaar ahaan.

Mahadsanidiin.

**Dr. Cabdisalaan Cabdiraxmaan Maxamed**
**Agaasimaha Guud**
**Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaliya**

JAMHUURIYADDA FEDERALKA SOOMAALIYA
HAY'ADDA ISTATISTIKADA QARANKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
SOMALI NATIONAL BUREAU OF STATISTICS

*Address:* Via Afgoi, Mogadishu, Banadir, Somalia
*Email:* dg@nbs.gov.so /snbs@nbs.gov.so/
*Tel:* +252-61-4960003, 2137